

# Inta aad sugeyso jawaabta codsigaaga

## **Haddii aan u baahanno in aan baaritaanno dheeri ah samayno**

Haddii aan u baahanno in aan baaritaanno dheeri ah kiiskaaga ku samayno, wakhti inta caadiga ah ka dheer ayay qaadan kartaa in aad jawaab hesho. Baaritaannada dheeriga ah waxay tusaale ahaan noqon karaan in aan dukumiintigaaga baarno ama aqoonsigaaga xaqiijinno. Waxaa iyana jiri kara baaritaanno kale. UDI waxay inta badan u baahataa in ay hay'adaha kale ee dawladdu caawiyaan. Sidaas darteed ayay wakhti dheer u qaadan kartaa.

Muddada aad sugeyso waxba kama sheegayso in ay u badan tahay in laguu oggolaado in aad Norway joogto iyo in kale. Waxaa laga yaabaa in dad kale oo ku jira xerada aad ku jirto in ay jawaabta helaan adiga hortaa. Taas micnaheedu ma aha in ay kiiskaaga wax ka khaldan yihiin, ama in ay UDI ku hilmaantay. Waa mid la xiriirta habka aan shaqadannada u maarayno.

Waan kuu soo sheegaynaa marka aan kiiskaaga ka baaraandegno.

## **Saamayn ma ku yeelan karaa dhererka muddada ay UDI codsigeyga ka baaraandegayso?**

Saamayn kuma yeelan kartid dhererka muddada aan codsigaaga ka baaraandegayno.

Haddii aad taleefan noo soo dirto oo aad na weydiiso muddada aad jawaabta sii sugi doonto, waxaan ku siin doonnaa warbixin la mid ah midda ku qoran qoraalka warbixinta muddada sugitaanka. Wax intaas ka badan kaagama sheegi karno muddada aad sugi doonto.

Haddii aadan doonayn in aad sugto in ay UDI kiiskaaga ka baaraandegto, waxaa lagaa caawin karaa in aad ku laabato dalkaagii ama dal kale oo aad oggolaasho joogitaan ku leedahay.

Sidii aad u codsan lahayd in lagaa caawiyo sidii aad u laaban lahayd iyo caawinta aad heli karto inta ay le'eg tahay waxaad ka akhrisan kartaa <https://www.udi.no/return>. Wuxaad

sidoo kale la xiriiri kartaa International Organization for Migration (IOM) si aad warbixin intan ka badan u heshid, adiga oo kala xiriiraya telefoonka 23 10 53 20 ama [www.iom.no](http://www.iom.no).

## **Soo dirista waraaqo aqoonsi ama caddayn dhakhtareed**

### **Wixii waraaqo aqoonsi ah waxaa loo dirayaa booliska**

Waa muhiim in aad ku dadaasho sidii aad waraaqo aqoonsi ku keeni lahayd. Waraaqo orijinal ah ha u soo dirin UDI, ee gee saldhigga booliska ee meesha aad deggan tahay. Sidoo kale, waraaqaha boostada ayaad ugu soo diri kartaa Waaxqada booliska arrimaha ajnebiga. Ciwaanku waa:

Politiets utlendingsenhet  
v/ Dokumentsenteret  
Postboks 2095 Vika  
0125 Oslo

Waa in aad magacaaga iyo lambarkaaga DUF ku qortaa warqad oo aad warqadda ku soo riddaa bokhshadda.

### **Wixii caddayn dhakhtareed ah waxaa loo dirayaa UDI**

Haddii aad qabto dhibaato caafimaad oo aad aamminsan tahay in ay codsigaaga micno u samaynayso, waxaa markaas muhiim ah in aad keento caddayn dhakhtareed. Caddaynta dhakhtarka waxaad u diraysaa UDI.

Ciwaanku waa:

UDI  
Postboks 2098 Vika  
0125 Oslo

Waa in aad magacaaga iyo lambarkaaga DUF ku qortaa warqad oo aad warqadda ku soo riddaa bokhshadda.

## **Warbixin iimayl laguugu soo dirayo**

Warbixinta kiiskaaga waxaa laguugu soo dirayaa iimaylkaaga. Iimayllada waxaa laguugu soo dirayaa ciwaankii iimaylka ee aad na siisay.

Farriinta u horreysa waxaad naga heli doontaa marka uu kiiskaagu na soo gaaro oo aan booliska ka helno. Marka danbana waxaana kuu soo diri doonaa farriimo kale. Sida in kiiskaagi laga baaraandegayo ama in aan go'aan kaa gaarnay.

Farriimuhu waxay ku qornaan doonaan af-norwiji iyo af-ingiriis. Farriimuhu ma xambaarsanaan doonaan warbixin sheegaysa in aad tahay magabgelyadoone.

Haddii aadan doonayn in aan iimaylladaas kuu soo dirno waa in aad taas noo soo sheegtaa. Adiga oo markaa adeeggayaga hagista ka soo wici kara taleefan lambarka 23 35 16 00.